



National Institute for Public Health
and the Environment
Ministry of Health, Welfare and Sport

Ilmahaaga ka badbaadi cudurada infakshanka

Mashruuca Tallaalka Dowladda



Ku dhowaad 95% caruurta Nederland ku nool way ka tallaalan yihiin cudurada infakshanka. Nadaafadda oo la waanaajiyo, daryeelka caafimaad oo wanaagsan iyo tallaalka caruurta darteed ayay nasiib wanaag dhimashada cudurada infakshanka loo dhinto Nederland ku yartahay. Mashruuca Tallaalka Dowladda, kaliya kama hortago dhimashada laakiin wuxuu ka hortagaa jirrooyinka badan iyo suuragalnimada cuuryaamidda.



Maxay yihiin cudurada infakshanka?

Cudurada infakshanka waxaa badanaa sababa bakteeriyada ama fayrus. Qaabka leysku qaadsiiyo way kala culus tahay. Badanaa cudurada infakshanka hadday ku hayaan dhowr maalmood ayaad jirro dareemaysaa. Haddii aad sii darsatana waxaa loo baahan karaa in isbitaal lagu dhigo.

Marmar dhif ah cudurka infakshanka intuu darsado ayuu wuxuu sababi karaa cuuryaannimo joogto ah ama dhimasho. Hadafka Mashruuca Tallaalka Dowladda waa in marxaladahaas qatarta ah laga hortago.

Waa maxay sababta tallaalku muhiim u yahay?

Tallaalku wuxuu jirkaaga ka caawinayaa inuu yeesho awood uu bakteeriyada iyo fayruska jirrooyinka keena isaga difaaco. Sidaa ayaadna uga difaacan tahay qatarta cuduradaas. Waxaana taa sii dheer adigoo dadka kale cudurka u gudbin karin. Haddii caruurta tallaalan ay tiro yaryihiin, markaas bakteeriyadii iyo fayruskiiba way baahi karaan oo muddo gaaban ayay caruur badan cudurkii isqabadsiiin karaan.

Mashruuca Tallaalka ee Dowladda Nederland

Waddamada adduunka oo dhan tallaalka caruurta way tallaalaan. Waddan walba wuxuu leeyahay barnaamij tallaallidda caruurta oo u gaar ah. Nederland muddo 60 sano ka badan ayay caruurta barnaamij tallaal qaataan. Tallaalka lasiiyo 12-ka cudur ee soo socda ayay ka hortagaan.

Gowracatada

Gowracatadu waa jirro culus oo dhuunta ku dhacda. Ilmaha qaba waxey qatar ugu jiraan iney hirqadaan (neefta ku dhegto). Gowracatadu Nederland hadda waa ku nadir (laguma arko).

Xiiqdheer

Xiiqdheertu waxay sababta qufac culus oo bilo socon kara. Tanina waxay qaasatan qatar u tahay dhallaanka yaryar. Qufaca badani tabar yari iyo dhaawac maskaxda gaara ayuu u keeni karaa. Xitaa caruurta way u dhiman karaan. Jirradaani caruurta la tallaalo halistaas uma laha. Tallaalka xiiqdheerta difaaca waa mid difaaciisu fiican yahay laakiin boqolkiiba boqol ma ahan, mid abadiyan ahna ma aha. Sidaas darteed ayayna xiiqdheertu weli Nederland uga jirtaa.

Teetanda

Teetanadu waxay sababtaa muruqyada oo isku soo urura. Haddii aan la daaweyn teetanada waa loo dhintaa. Teetanada laysma qaadsiiyo. Ilmaha wuxuu teetano qaadi karaa haddii xayawaan qaniino ama qashinka jidadka yaalla uu nabar furan ka gaaro.

Dabeysaha

Cuuryaaminta ilmaha ama dabeysaha waa mid caruurta u keenya cuuryaannimo abadiyan ah oo lugaha, gacmaha iyo/ama murqaha neefqaadashada ku timaada.

Jirada-Hib

Bakteeriyada-Hib waxay sababtaa infakshan qatar ah sida dhiigga oo sumooba iyo xuubka maskaxda, daboolka cunaha, sambabka ama cududada laablaabma oo jirada.

Cagaariyowga B

Cagaariyowga noociisa B waa nabar beerka ku dhasha. Haddii aan laga bogsoon waxuu markaa cagaariyowgu sababi karaa in beerku qalalo oo yaraado, taaso markaa kaankarada beerka sababi karta.

Cudurka Pneumokokkada

Pneumokokkada waa bakteeriyada sababta dhiigga oo sumooba, infekshan aad u daran oo sambabka iyo xuubka maskaxda ku dhaca. Xitaa ilmuhu dhagool ayay ku noqon karaan.

Tallaalku wuxuu difaaca badankood noocyada kala duwan ee pneumokokkada ee jiradaas sababa.

Qaamow Qashiir

Qaamow qashiir waa infakshan ku dhaca qanjirada candhuufta. Sidaas darteed ayay ilmaha qaamow qashiirka qaba ay daanka iyo qoorta uga bararaan. Mararka qaarkoodna xuubka maskaxda ayaa jirada

Jadeecada

Jadeecada waa jirka oo wax kasoo yaacaan, qandho saaid ahna leh. Badanaa waxaa ka dhacda in dhegaha nabar yeesha, mararka qaarna sambabka ama maskaxda oo jirata taasoo loo dhiman karo. Jadeecada waa jirro laysku daarto.



Rubella (Rodehond)

Rubella (Rodehond) jiradaan lafteeda waa mid jirka wax kasoo yaacaan, laakiin aad uga qatar yar jadeecada.

Jiradaani xilliga uurka ayay ilmaha aan dhalan qatar ku tahay. Ilmuhu isagoon aad iyo aad aan caadi u ahayn ayuu dhalan karaa. Si looga hortago in haweenka uurka leh cudurkii lagu daarto, ayaa waxaa xitaa la tallaalaa wiilasha.

Meningitis

Meningitis waxaa sababa noocyo kala duwan oo ah bakteeriyada keenta Meningitis. Caruurta Meningitis ku dhacdo waxaa infakshan ka gelaayaa xuubka maskaxda ama dhiigga ayaa ka sumoobaya taaso muddo gaaban gudahood dhimasho sababi karta. Haddii caruurta ka bogsoodaan waxay si joogto ah dhib ugu qabi karaan dhagoolnimo iyo waxbarashada iyo dabeecadda oo ay dhib ku qabi karaan.

Dhiigga sumoobaya darteed mararka qaar waa in lug ama gacan la gooyaa.


Tallaaladee ilmahayga lasiinayaa?

Tallaalka 1
 Tallaalka 2

6-9 wiig/sitimaan


DKTP-Hib-HepB

Pneu



3 bilood

DKTP-Hib-HepB



4 bilood

DKTP-Hib-HepB

Pneu



11 bilood

DKTP-Hib-HepB


Pneu



14 bilood


BMR

MenACWY



4 sano

DKTP



9 sano

DTP

BMR



12/13 sano (Tallaalka 2-aad, 6 bilood kadib)

HPV

HPV



Macnaha xarfaha lasoo gaabiyay

D Gowracato
 K Xiiqdheer
 T Teetano

P Dabaysha
 Hib Haemophilus influenzae type b
 HepB Cagaariyowga

Pneu Pneumococcal
 B Qaamow Qashiir
 M Jadeeco

R MenACWY
 HPV

Rubella
 Meningitis ACWY
 Humaan Papillomavirus

* Gabdhaha oo keliya



HPV

Humaan papillomavirus (HPV) waa koox fayrusyo ah oo kaankarada dhuunta ilma-galeenka iyo noocyo kale oo kaankaro ah sababa. Iyadoon la ogeyn ayay dadka oo dhan badankood inta ay noolyihiin mar uun fayruskaan lagu daartaa. Tallaalku wuxuu kaa difaacayaa 2 nooc oo HPV ah kuwaasoo qiyaastii 70% kaankarada dhuunta ilmo-galeenka ku dhacda sababa.

Goormaa ilmahayga la tallaalayaa?

Marka ilmuhu 6 ilaa 9 wiig/sitimaan jirsado ayaa labada tallaal ee u horraysa la tallaalayaa. Is-difaaca jirka ayaa markey intaas jiraan si wacan taasi ula qabasan karo. Waqtiga la tallaalaayo waa waqti lagu aadiyay xilliga ugu fiican ee ay difaac siin karaan. Qaasatan ilmaha hadda dhashay ayaa cudurada infakshanka u nugul, qaasatan xiiqdheerta. Badanaa ilmaha laba duritaan/tallaal ayaa markiiba la siiyaa. Waxaana laga tallaalaa cajirka ama garabka.

Ilmahaygu wuu jirran yahay. Mala tallaali karaa?

Ilmahaagu ma jiran yahay ama daawo ma qaataa, markaa la tasho dhaqtarka carruurta ama kalkaalisada. Mararka qaar waxaa fiican in tallaalka dib loo dhigo.

Tallaalku caafimaad ahaan maleyska hubaa?

Waa muhiim in waalidiintu isweydiyaan waxa tallaalku ka kooban yahay iyo inay ilmahaaga caafimaad u yihiin iyo inkale. Inta aan daawada tallaalka isticmaal-keeda la billaabin kahor ayaa sida daawooyinka kale aad iyo aad loo tijaabiyaa. Markii la habsado in daawada tallaalku mid dhibaato la'aan shaqeyneysa tahay ayaa caruurta la siiyaa. Xitaa xilliga la isticmaalaayo daawada tallaalka aad ayaa loo ilaaliyaa, taasina Nederland oo kaliya ma ahan ee waa mid adduunka oo dhan ka jirta.

Website-ka Mashruuca Tallaalka Dowladda waxa aad ka akhrisan kartaa curiyaayasha ee tallalka ku jira. Lifaaqa qoraalka warbixinta tallaalada Mashruuca Tallaalka Dowladda loo adeegsado, xitaa waxaad ka heli kartaa isla website-kaa.

Saameynta dheeraadka (bijwerking) ee tallaalada

Saameynta dheeraadka ee daawada tallaalka waa mid ilmaha iyo waalidiintaba dhib ku ah. Waalidinta qaarkood way ka welwelaan saameynta dheeraadka. Tallaaliddu badanaa saameyn dheeraad ah ayay yeelataa maadaama ay is-difaaca ee jirka howlgeliyaan. Saameynada dheeraadka waa kuwo badanaa aan cuslayn, iyagaana iskood isaga istaaga. Saameynada dheeraadka waxay badanaa

bilowdaan maalinta ilmaha lasoo tallaalay. Tallaalada difaaca Qaamow-Qashiirka, Jadeecada, Rubella (Rodehond) iyo tallaalka-BMR waxay badanaa saameyn dheeraad ah yeeshaan 5 ilaa 12 maalmood maalintii la tallaalay kadib. Qandho qafiif ah tallaalka keddib waa waxa inta badan lala kulmo. Xitaa meesha laga tallaalay ayaa barari karta ama gaduudan karta.

Talooyinka wax ka qabashada saameynta dheeraadka

- Haddii qandho heyso biyo cabitaan badan ayaa muhiim ah
- Dhallaanka yaryar xambaarid iyo maaweelid ayaa caawineysa haddii ay kuugu dhegdhegayaan
- Haddii ilmuhu xanuun ama qandho heyso, waxaa caawin kara xanuun joojiye (Paracetamol). Lifaafa sharraxaadda ah ee la socda ka fiiri caddada ilmaha inay qaataan loo oggol yahay.
- Waxaa habboon inaan lugta ama gacanta la tallaalay aan taataabashada laga badin. Taasi xanuunka ayay sii badin kartaa.
- Haddii aad welwel qabto maadaama ilmuhu aad u jiran yahay ama dhowr maalmood kadib uu weli kaa laalaado ama ay qandhadii iska sii heyso waxaa habboon inaad dhaqtarka qoyska aad wacdo oo aad la tashato.



Haddii aad saameyn dheeraad ah aragto soo sheeg

Haddii aad aragto saameyn dheeraad ah ee tallaalka ka timaada u sheeg dhaqtarka ama kalkaalisada caafimaadka ee ilmaha tallaalay. Iyaga ayaa markaa saameyntaas dheeraadka la arkay Xaruunta Saameynaha Dheeraadka ee Lareb u gudbinaaya.

Taa waxaad xitaa sameyn kartaa adigoo bogga website-ka Mashruuca Tallaalka ee Dowladda isticmaalaya.

Macluumaadka tallaalka ku saabsan

Hey'adda Dowladda ee Daryeelka Caafimaadka Bulshada iyo Bay'ada (RIVM), ayaa waalidiinta ka wargelisa arrimaha tallaalka. Wax yar kadib ilmuhu markuu dhasho ayaa waxaa waalidiinta la siinayaa qoraallo ku saabsan tallaalka caruurta ilaa inta ay 14 bilood ka gaarayaan. Markuu ilmuhu 4 iyo 9 sano gaaro, ayay waalidiintu haddana casuumaad cusub oo inay ilmihii tallaal u keenan ah helayaan.

Gabdhuhu xitaa marka ay 12 jir gaaraan ayay casuumaad ah inay tallaal u yimaadaan helayaan. Tallaalkaas waa mid kaankarada dhuunta ilmagaaleenka gasha looga hortegayo.

Tallaalka seddax meelood ayaa laga diiwaangelinayaa: feylka ay daryeelka caafimaadka da'yarta (jeugd- gezondheidszorg) hayaan, buugga caddeynta tallaalka caruurta iyo xaruunta ee dalka oo dhan RIVM. Hey'adda RIVM waxay macluumaadka u isticmaashaa inay tayada barnaamijka si joogto ah ugu miisaanto, iney xusiisinada dirto, inay awood u yeelato iney koobiyada buuga caddeynta tallaalka bixin karto iyo inay ogaato caruurta Nederland boqolkiiba inta ka tallaalan. Haddii jirro ah kuwa lays-qaadsiiyo waddanka ka dillaacdo, aad ayay muhiim u tahay in la ogaado tirada caruurta ah ee jiradaas difaac ka heysata, si markaa loo ogaado inta ay la ekaan karto baaxadda baahidda jiradaas iyo tallaabooyinka ku habboon ee dowladda in ay qaado tahay.



Macluumaad dheeraad ah ma u baahan tahay?

Website-ka Mashruuca Tallaalka Dowladda ayaad macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan jirooyinka infakshanka, tallaalka iyo saameyntiisa dheeraadka ka heleysaa. Waxaad xitaa ka aqrisan kartaa sida daraasad loogu sameeyo saameynta dheeraadka ee tallaalka iyo sida u egtahay booqasho aad Xarunta Hooyada iyo Dhallaanka ku tagto.

Website-ka: [Rijksvaccinatieprogramma.nl](https://rijksvaccinatieprogramma.nl)

This is a publication of:

**National Institute for Public Health
and the Environment, RIVM**

PO Box 1 | 3720 BA Bilthoven

The Netherlands

www.rivm.nl

April 2018

Committed to *health and sustainability*